Xisbiga Isbahaysiga Qaranka

Xisbiga Isbahaysiga Qaranka waa xisbi siyaasadeed oo midig-dhexe ah, oo doonaya inuu horumariyo Finland sidii bulsho furfuran iyagoo ku salaynaya nidaam xor ah, nidaam bulsho oo reer galbeed ah oo shakhsiyaadka xorriyaddooda iyo xuquuqda aadanaha la ilaaliyo. Qiyamkeenna ugu muhiimsan waa xorriyadda iyo mas'uuliyadda, waxbarashada, fursadaha loo simanyahay, dhiirigelinta, caalaminimo iyo daryeelka.

Sida ay qabaan Xisbiga Isbahaysiga Qaranka, degmooyinku waa inay fiiro gaar ah u yeeshaan sida shaqooyin badan, shirkado iyo koboc looga heli karo aagagga. Markay nolol ka jirto degmooyinka oo dhaqaaluhuna si wanaagsan u socdo, waxay keentaa lacag, taas oo loo adeegsan karo dayactirka adeegyada, lagu hagaajin karo amniga, raaxada, bay'adda iyo fursadaha hiwaayadda. Fayo-qabka laguma gaadho iyadoo si aan dhammaad lahayn loo qaybiyo lacag sii qiima beelaysa, laakiin taa beddelkeeda iyada oo la kobciyo qasnada guud si markaa mustaqbalku u fiicnaado sidoo kale.

Waxaan dhihi karnaa haa markaan ka hadlayno dhaqaale xoogan oo degmada ah, awooda wax iibsiga ee dadka, guusha shirkadaha iyo horumar waara

Xisbiga Isbaheysiga Qaranku ma ansaxinayo maareynta maaliyadeed ee la dayacay, halkaasoo dhibaatooyinka aan waxba laga qaban oo wax hagaajin ahna la samayn. Ujeedadayadu waa in aan xaqiijino in canshuuraha degmooyinku aan lagu kordhin degmooyinka Finland inta lagu guda jiro mudadan wafdiga. Kordhinta qiimaha nolosha waa in sidoo kale la xakameeyaa. Khidmadaha maaraynta qashinka, khidmadaha qaybinta korontada, khidmadaha biyaha ama khidmadaha kale waa inaan si otomaatig ah loo kordhin sanad kasta.

Xisbiga Isbahaysiga Qaranka waa xisbiga ugu fiican ee saaxiibka la ah ganacsi abuurayaasha Finland. Waxaan dooneynaa inaan ka dhigno dhamaan degmooyinka kuwo saaxiib u ah ganacsi abuuridda wanaagsan. Degmooyinka shaqadooda ugu weyn ayaa ah inay bixiyaan shuruudo wanaagsan oo ku saabsan ganacsi abuurida.

Xisbiga Isbahaysiga Qaranka ayaa sidoo kale leh haa marka la raadinayo xalal geesinimo leh oo ku aadan dhibaatooyinka ugu adag ee waqtigeena. Isbeddelka cimilada waa arrin caalami ah laakiin waa arrin adag loogaga hor tagi karaa heerdegmooyin iyo magaalooyinba. Xisbiga Isbahaysiga Qaranka wuxuu rabaa in dabciga uu ahaado mid nadiif ah oo u kala duwan jiilalka soo socda.

Waxaan aaminsanahay in waxbarashadu xambaarsan tahay: waxaan dooneynaa in qof walba uu waxbarasho wanaagsan ka helo iskuulada oo aan cidna loo xoogsheegan

Xisbiga Isbahaysiga Qaranka wuxuu rabaa inuu hubiyo in qof kasta oo dhalinyaro ah uu leeyahay xirfado aasaasi ah oo wanaagsan, sida akhriska, xisaabinta iyo xirfadaha bulshada, kadib markuu dhameeyo dugsiga aasaasiga ah. Waxaan dooneynaa in carruurta oo dhan ay ka xaadiraan dugsiga xanaanada carruurta oo ay da'doodu tahay 5 jir si markaa qof walba u helo xirfado ku filan markuu iskuulka bilaabayo.

Ujeedkeena waa in degmadu bixiso waxbarasho ka badan inta looga baahan yahay heerka qaran. Casharrada waa lagu dari karaa, tusaale ahaan, maadooyinka luqadda ah, Finnishka oo ah af hooyo, xisaab ama xiisaddaha jimicsiga.

Waxaan dooneynaa inaan sameyno wax walba oo suurtagal ah si looga takhaluso xoogsheegashada ka dhacda iskullka. Kiis kasta oo xoog sheegasho ah wuxuu u baahan yahay faragelin, iyo haddii loo baahdo, maarayn dheeraad ah. Waxaan dalbaneynaa in dhismayaashu iskuullada noqdaan kuwo caafimaad qaba oo ammaan ah.

Waxaan rabnaa in dadku safafka ka soo baxaan si ay daryeel u helaan: waxaan aaminsanahay dawladaha hoose iyo xorriyadda ay dadku u leeyihiin inay wax doortaan, waxaan diidanahay maamulka gobolka

Xisbiga isbahaysiga qaran wuxuu rabaa inuu saxo dhibaatooyinka ka jira adeegyada bulshada iyo daryeelka caafimaadka iyadoo lagu saleynayo nidaamka hada jira iyadoo aan la helin maamul goboleed. Waxaan diidanahay canshuurta cusub ee gobolka maxaa yeelay waxay sidoo kale kordhin doontaa canshuuraha shaqada.

Halkii saf loo geli lahaa, dadku waxay u baahan yihiin inay awoodaan inay helaan daryeel. Waxaan rabnaa in qof kastaa helo daryeel bil gudaheed, halka shuruudaha hadda jira ay yihiin saddex bilood. Haddii aan adeegga lagu bixinin bil gudaheed, shakhsiga waa in la siiyaa foojar adeeg, kaas oo loo isticmaali karo, tusaale ahaan, in lagu booqdo dhakhtar gaar ah.

Waa inay jirtaa ilo ku filan oo loogu talagalay adeegyada qoyska si loo hubiyo wax u qabashada hore/carruurta. Qof kasta oo qaba dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka waa inuu marka horaba helaa daryeel iyo daaweyn habboon kahor inta aysan dhicin dhibaatooyinka halista ah.

Waayeelada waa hawl wadeenno firfircoon, ma aha oo keliya dadka isticmaala adeegga. Adeegyada waayeelka waa in loo tixgeliyaa inay yihiin hay'ad sidaas darteed marka lagu daro guryaha dadka da'da ah lagu xanaaneeyo, daryeelka guriga iyo shaqada daryeelka qoyska. Muhiimadda baxnaaninta waa in la soo qaadaa si shakhsiyaad badan intii suurtagal ah ugu noolaadaan nolol caafimaad leh iyagoo jooga guryahooda hadba inta ay jecel yihiin.

Annaga arrimaha yaryar waxay noo yihiin arrimo waaweyn: waxaan heli doonnaa raadad dabci ah, hoolalka lagu dabaasho iyo masraxyada xagaaga oo qaabaysan

Waxqabadka nolol maalmeedka badanaa waxaa lagu tilmaamaa inay yihiin arrimo yaryar. Aragtideena, ujeedka degmo kasta oo Finnish ku taala waa inay noqotaa inay xaqiijiso in nolol maalmeedkayagu u shaqeeyo sida ugu fiican adduunka.

Degmo wanaagsan, saldhigyada, jidadka iyo jardiinooyinka ayaa ammaan u ah qof walba, wakhti kasta oo maalintii ka mid ah. Nolol maalmeedka waa inay ahaataa mid amaan ah: waa inuu jiraa laydh ku filan, isgoysyada dadka lugaynaya maraan waa inay ahaadaan kuwo amaan ah oo meelaha la dagan yahay waa inaan loo qaybin kuwo wanaagsan iyo kuwo xun.

Gaadiidka mustaqbalka waa inuu dhiirageliyaa qiiqa yar iyo dhaqdhaqaaq fudud. Ujeedka macquulka ahi maaha in la yareeyo dhaqdhaqaaqa ama wadista gawaarida, laakiin waa in la yareeyo qiiqa. Anagu ma taageersani canshuuraha waddooyinka, taas oo lagu dabaqi doono canshuuraha horayba u badnaa.

Xisbiga Isbaheysiga Qaranka wuxuu tixgelinayaa in goobaha isboortiga maxalliga ah, waddooyinka orodka, goobaha orodka barafka iyo raadadka bay'adda ay xaalad wanaagsan ku sugan yihiin. Wadashaqeynta lala yeelanayo ururada iyo naadiyada waa inay si habsami leh u socodaan. Waxaan rabnaa inaan hubinno in ilmo kasta iyo qof kasta oo dhalinyaro ah uu leeyahay hiwaayad.

Magaalooyinka, dhaqanku wuxuu ka dhex muuqdaa machadyada dhaqanka ee tayada sare leh iyo muuqaalka magaalada. Naqshadaynta aagagga cusub iyo dhismayaasha waa inay tixgeliyaan farshaxanka ka farxiya dadka degan degmada marka horaba.